

**Xeer lamba. 98 ee 29 Juun 1967**

**Wax ka Bedelid Qaab-Dhismeedka Qareenada Dowladda ee Guddonka Golaha Wasiiradaha**

### **MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

Kadib markii la arkay qodobka 75 ee Dastuurka;

Kadib markii la arkay qod. 2 iyo 35 ee Sharciga lamba. 7 ee 15 Maarso 1962 iyo wax ka bedelidii lagu suubiyey Xeeridamiyaha Shaqalaha Rayidka ah ee Dowladda;

Kadib markii la arkay qod. 9 ee Sharciga lamba. 14 ee 3 Juun 1962 iyo wax ka bedelidii Xeeridamiyaha Dowladda;

Kadib markii la arkay Xeer-sharci lamba. 6 ee 30 Maarso 1965 oo loo beddeley sharci lamba. 7 ee 1 Juun 1965 oo khuseeya xeerarka qaab-dhismeedka iyo daryeelka dhaqaale ee Shaqaalaha Dowladda;

Kadib markii la arkay qod. 12 ee DPR lamba. 316 ee 17 Disember 1962 oo ku saabsan qabka guud ee Xafiisyada Dhexe ee Wasiiradaha;

Kadib markii la arkay qod. 8, 13, iyo 14 ee DPR lamba. 13 ee 20 Maarso 1965 oo ku saabsan Xeerka Qaabka iyo dhismaha qaabka joogtada ee Guddooka Golaha Wasiraha iyo Xafiisyada hoos taga;

Kadib markii la garoowsaday baahida loo qabo adeegyada iyo in la soo saaro sharciyo dib loogu habeeyo xafiisyada iyo qaab-dhismeedka iyo wax ka bedelka xafiisyada iyo Qareenada Dowlada kuwaas oo loogu magacaabi doono “*Qareenada Guud ee Dowladda*”

Kadib markii la dhegeystay soo jeedinta Rai’sul Wasaraaha oo uu la jiro Wasiirka Maaliyada;

Kadib markii aragtida Golaha Wasaaradaha la dhegeystay.

### **WAXAA LA SOO SAARAY**

#### **Qod. 1**

Qareenada Canshuuradka Dowladda waxaa loo bixiyey magaca ah “Qareenada Guud ee Dowladda”.

#### **Qod. 2**

Xafiisyada iyo xubnaha ka tirsan Qareenada Guud ee Dowladda waxay u kala qeybsan yihiin sida ku qoran Shaxda halkaan ku dhegeen taas oo qeyb ka ah sharcigaan.

#### **Qod. 3**

Waxaa la buriyey xeer kasta oo ka hor imaanay dekreetada iyadoo la tixgeliey awoodada la siiyey Qareenada Guud ee Dalka oo ku qoran qod. 8 ee DPR lamba. 13 ee 20 Maarso 1965.

**Qod. 4**

Dekretadan waxaa lagu keydin doonaa Keyda Rasmiga ah ee Shuruucda iyo Xeeryinka ee Jamhuuriyadda Somaliaya waxaana lagu faafin doonaa Faafinta Rasmiga.

Muqdisho, 27 Juun 1967.

**Aden Abdulle Osman**

Rai'sul Wasaaraha  
**Abdirizak Haji Hussein**

Wasiirka Caddaladda iyo Arrimaha Diinta  
**Ali Omar Shegow**

---

**GUDDONKA GOLAHA WASIIRADAHA  
XAFIIKA QAREENEDDA GUUD EE DOWLADDA**

Rukni	Hey'adda iyo jadada	Qeybta	Darajo
3-5001	Qareen Guud ee dowlad	Prof	A2
3-5502	Xoghayaha gaarka	xirfadle	C
3-5006	Qore	xirfadle	C
3-5008/17	Diiwan geliye	xirfadle	C
3-5016	Maamule xafiis	xirfale	B7
3-5009/a0/25	3 Boostale	shaq. Hoose	D

**QEYBTA MADANIGA & ARRIMAHA SHARI'AT**

Rukni	Hey'adda iyo jagada	Qaybta	Darajo
3-5003	Ku Xigeen-Jaamici	Prof	A3
3-5004	Jaamici	Prof	A
3-5007	Qore	xirfadle	C
3-5020	1 Boostale	shaq. Hoose	D

**QAYBTA CIQAABTA-CANSHUURTA IYO IDAARIGA**

Rukni	Hay'adda iyo jagada	Qeybta	Darajo
3-5019	Ku-xigeen (jaamici)	Prof	A3
3-5005	Jaamici	Prof.	A
3-5013	Qore	Xirfadle	C
3-5018	1 boostale	shaq. Hoose	D

**Adeega Faafinta Rasmiga iyo Diiwaanka**

Rukni	Hey'adda iyo jagada	Qeybta	Darajo
3-5012	Madaxa Waaxda (jaamici) toos u hoos tago Xafiiska Qareenka Guud ee Dowladda	Prof	A5
3-5011	Maktabe Haaye	Xirfadle	B
3-5015	Diiwaan Haaye	xirfadle	C
3-5021	Qore	xirfadle	C10
3-5022	Qore (Faafinta Rasmiga)	xirfadle	D
3-5015	3 Boostale	xirfadle	C